# Talooyinka Fudfudud ee Booqashada Daryeelka Carruurta

Waaxda Caruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska ee Gobolka Washington (DCYF) waxaa ka go'an ilaalinta bixiyayaasha caafimaadka, carruurta iyo laysan siinta shaqaalaha inta lagu guda jiro cudurka faafaha COVID-19 ee socda. Iyada oo lagu dadaalayo in sidaas la sameeyo, siyaasadaha iyo habraacyada gargaarka degdegga ah ayaa la sameeyay si shaqada laysan siinta loogu qabto qaab ka duwan. Siyaasadaha iyo habraacyada gargaarka degdegga ah waxay ka hadli doonaan:

- Codsiyada Bilowga
- Shuruudaha bilowga ilaa iyo kuwa aan dhicin
- Booqashoyinka Kormeeraha
- Guuritaanka

Ugu yaraan sanadka soo socda, habraacyadan waxaa adeegsan doona shaqaalaha laysanka bixiya. Waakuwan shuruudaha qaar, ujeeddooyinka hannaankan awgiisna, leh macne gaar ah:

- **Booqashada Onleenka ah:** Waa marka laysan bixiyaha DCYF uu kormeero xarunta daryeelka caruurta isaga oo markaas ka fog xarunta. Kormeeraha ama kormeerka bilowga ah, tani waxaa kamid ahaanaya dhammaystirka liiska hubinta.
- **Masraxa Onleenka ah:** Waa habka loo isticmaalo in lagu kormeero xarunta daryeelka carruurta iyada oo aan la joogin. Masxarxyadan **looguma** talagalin in lagu duubo kormeerka balse waxaa logu talagalay inay ahaadaan muuqaal toos ah oo u sahlaya laysan bixiyaha inuu arko xarunta. FaceTime, Zoom iyo WebEx ayaa ah tusaalayaasha masraxa onleenka ah.
- **Booqashada Xaqiijinta Caafimaadka iyo Amniga:** Waa marka shaqaalaha laysanka daryeelka caruurta bixiya uu aado xarunta si uu socod ugu maro/kormeer ugu sameeyo si loo xaqiijiyo waxa la arkay intii lagu guda jiray booqashada onleenka ah.
- **Warbixinta Kormeerka:** Waa warbixinta uu soo saaro laysan bixiyaha daryeelka caruurta ee WA Compass ee sheegta WAC (Sharciga Maamulka Washington) ee la arkay inaan loo hogaansaneyn inta lagu jiro kormeer kasta.
- **Kaalmo Farsamo:** Macluumaadka ama talo soo jeedinta uu bixiyo laysan bixiyaha daryeelka carruurta si looga caawiyo bixiyaha inuu ka soo baxo shuruudaha WAC.
- **COVID-19:** (cudurka ba'an ee neef-mareenka ee coronavirus 2 (SARS-CoV-2) Isha: Centers for Disease Control and Prevention (CDC) (Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada). Si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah onleenka, booqo **www.cdc.gov/coronavirus/2019-nCoV/index.html**.

Waxaa jira dhowr farqi oo u dhaxeeya Booqashada Koowaad ee Laysan Siinta, Kormeer iyo Booqashada bilowga ilaa iyo tan aan dhicin.

- Labaduba mida bilowga iyo mida bilowga ilaa iyo tan aan dhicin, laysan bixiyaha wuxuu u diri doonaa bixiyaha liiska hubinta ee koowaad si bixiyaha uu isku qiimeeyo oo uu u bayaaniyo su'aalaha uu qabi karo.
- Booqashada koowaad, kahor inta aan la helin laysan ugu hore ee koowaad, booqashada Xaqiijinta Caafimaadka iyo Amniga uma baahna in la qariyo oo waxaana lagu qorsheyn karaa rabitaanka codsadaha.
- Inta lgu guda jiro booqashada xaqiijinta xaafimaadka iyo amniga ee kormeeraha, **kaliya** shay'yaasha ku jira qaybta liiska hubinta **ama** shay'yaasha halisaha degdegga leh ayaa looga hadli doonaa warbixinta kormeerka. Dhammaan walaacyada kale waxaa wax looga qaban doonaa iyada oo loo adeegsanayo kaalmada farsamada. Haddii booqasho dib-u-eegis ah gadaal dambe looga baahdo, wax kasta oo lagu arko booqashadaas inuusan hoggaansaneen wuxuu sababi doonaa warbixin kormeer oo cusub - sida ay ahayd tan iyo Ogosto 2019.

Waxa muhiimka ah in la xasuusto waa in waajibaadka iyo mas'uuliyadaha bixiyeyaasha daryeelka iyo laysan bixiyeyaasha labadaba aysan isbeddelin. Sida shaqada loo qabanayo ayaa la hagaajiyay si loo yareeyo khatarta ku imaan karta dadka oo dhan.

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# *Booqashooyinka Onleenka ee Daryeelka Carruurta*

BILOOW

Laysan bixiyaha ayaa la hadli doona bixiyaha daryeelka carruurta si qabanqaabo loogu sameeyo**Booqasho Onleen ah** iyo si loo sharraxo hannaanka Booqashada Onleenka ah. Tani waxaa kamid ah balse aan ku koobneyn:

- Waqti u habboon bixiyaha.
- Go'aaminta nooca masraxa onleenka ee sida ugu wanaagsan ugu shaqeeya daryeel bixiyaha.
- Sharraxaadda waxa uu daryel bixiyaha uu diyaar la noqonayo si booqashada degdeg loogu socodsiiyo.
- Sharraxaadda sida daryeel bixiyaha uu u awoodi doono "inuu u muujiyo" laysan bixiyaha dhinacyada kala duwan ee barnaamijkooda si liiska hubinta loo dhammeystiro.
- Sharraxaada in booqashada onleenka ah ay ku xigi doonto booqashada Xaqiijinta Caafimaadka iyo Amniga ee aan la shaacinin.

→

Waqtiga lagu heshiiyey, **Booqashada Onleenka ah** ayaa la qaban doonaa. Liiska hubinta ee ku habboon ayaa la dhammaystiri doonaa, haddii loo baahdana, Warbixin Kormeer ayaa la diyaarin doonaa. Inta lagu jiro booqashada, laysan bixiyaha ayaa bixin doona wixii kaalmo farsamo ah ee loo baahdo. Marka booqashada la dhameeyo, laysan bixiyaha wuxuu ugu diri doonaa adeeg bixiyaha liiska hubinta iyo Warbixinta Kormeerka iimayl. Saxiix lagama qaadi doono daryeel bixiyaha sababo la xiriira COVID -19 awgeed waana la diiwaangelin doonaa midan.

→

Daryeel bixiyaha wuxuu xaq u leeyahay inuu ka doodo xadgudubyada lagu xusay Warbixinta Kormeerka. Waxay sidoo kale u baahan yihiin inay bixiyaan xaqiijinta wixi sixitaan ah ay sameeyaan marka ay dhammaystiraan.

↓

Muddo 30 maalmood gudahood ah (14 maalmood oo ah U Guuritaanka Hoyga Qoyska), **Booqashada Xaqiijinta Caafimaadka iyo** Amniga ee aan la shaacinin ayaa waxaa sameyn doona laysan bixiye. Inta lagu guda jiro booqashadan, laysan bixiyaha wuxuu ku dhameystiri doonaa dhowr goob oo shaqo hal booqasho. Laysan bixiyaha wuxuu haysan doonaa liis hubin yar oo kooban oo laga soo saaray Booqashada Onleenka ah oo tilmaamaya:

- Shay'yaasha ku jira liiska hubinta ee lagu arki waayay booqashada onleenka ah iyada oo ay ugu wacan tahay xaddidaadda muuqaal baahinta tooska ah.
- Shay'yaasha ku jira liiska hubinta ee la arki waayay (sida calaamadaynta dhalooyinka, balse inta lagu guda jiray booqashada onleenka ah, ma jirin wax dhallaan ah oo la daryeelayay sidaa darteed lama arki karin).
- Shay'yaasha ku jiray liiska hubinta ee aan hoggaansaneyn.
- Xaqiiji shay kasta oo kamid ah shay'yada dib u hubinta ee caafimaad iyo amniga ee la arkay inti lagu jiray booqashada onleenka ah ee aan loo diiwangelin sida saxda ah.

→

Boqashada **Xaqiijinta Caafimaadka iyo Amniga** waxaa kamid ahaan doona:

- Xaqiijinta in qofna, oo uu kamid yahay laysan bixiyaha, uusan lahayn qaadid la ogyahay ama calaamadaha cudurka COVID-19.
- Xarunta oo si degdeg ah lugta loo mariyo si loo hubiyo WAC-yada (Xeerarka Amniga Washington) caafimaadka iyo amniga in laga soo baxay.
- Kormeerida wax kasta oo si hufan loogu arki waayay booqashada onleenka ah.
- Dib u eegista shay'yaasha aan hoggaansaneyn ee laga saxay kormeerka onleenka ah.

↓

Markuu ku laabato goobtiisa shaqada, laysan bixiyaha:

- Wuxuu diyaarini doonaa Warbixin Kormeer, hadii loo baahdo.
- Wuxuu la xiriiri doonaa daryeel bixiyaha si uu u siiyo wixii kaalmo farsamo ee habboon.
- Wuxuu iimayl ku diiri doonaa liiska hubinta ee la soo koobay iyo Warbixinta Kormeerka.

→

Haddii xaqiijinta u hoggaansanaanta aan lagu samayn karin sawirro, dukumiintiyo ama onleen ahaan, laysan bixiyaha waxaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu sameeyo booqasho kale oo uu goobta ku tago. Tani waxay raacaysaa isla nidaamkii ay DCYF raacday illaa iyo laga soo bilaabo Ogosto 2019.

---

*Hadaad ku rabto nuqulada dukumiintigan qaab ama luqad kale, fadlan la xiriir Xiriirada Degmada ee DCYF (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*

DCYF PUBLICATION LIC_0013 SM (08-2020) Somali